

SHAQADA QOYSKA IYO DARYEELAHA:

Sibteembar 2020

Taageerida Ardayda Barata Ingiriiska ee Da'yarta ah ayadoo la adeegsanaayo Ciyaarta Erayga

Shaybaarada Waxbarashada ee Gobalka Galbeed, Waqooyi galbeed, Waqooyi Bari iyo Jasiiradaha

Ka timid Xarunta Qaran ee Qiimaynta Waxbarashada ee IES

Qoysaska iyo daryeelayaasha, waxaad door muhiim ah ka ciyaaraysaa waxbarashada luuqada cunugaaga. Carruurta waxay baran karaan erayo cusub maalin kasta ayagoo dhagaysanaaya, ku hadlaaya, qoraaya, ama sawiraaya. Ujeedada shaqadaan waa in looga caawiyo ilmahaaga inuu barto uuna ku dhaqmo tiro yar oo erayo ah intii muddo ah, asagoo ka dhigaaya qayb ka mid ah eray bixintiisa.

Niyada kuhaay:

- Adigga iyo cunugaagu waxaad adeegsan kartaan luuqadaada hooyo ama Ingiriis hadba kii kuugu awood badan.
- Ku barashada erayada cusub luuqadaada hooyo ayaa sidoo kale ka caawinaysa cunugaaga inuu barto Ingiriiska.
- Waqtigaan la qaado cunugaaga. Wax isla barashadu waa baashaal!

Maxaa loo barayaa erayada?

Ku hadalka, akhrinta, iyo qorista erayada cusub maalin kasta ayaa ka caawisa carruurta inay dhisaan eray bixintooda.

Ana ku ciyaarno erayada.

Raac tallaabooyinka soo socda. Aan gadaal ka eegno taageerooyinka luuqada oo dheeraad ah.

Talaabada 1 aad: Dooro eray cusub si aad u barto cunugaaga. Wuxuu noqon karaa eray aad kasoo qaadatay buug, filin, webseed, ama wada sheekaysi.

Talaabada 2 aad: Sharaxaad fudud ka bixi erayga cusub. Tusaale: *Marka wax aad u wayn yahay waa aad u wayn.*



▶ **Talaabada 3 aad: Sii tusaalaha** erayga oo jumlad ku jira. Tusaale: *Qaruhu waa wax wayn marka loo fiirsho cinabka.*

▶ **Talaabada 4 aad:** Waydii cunugaaga inuu adeegsado **erayga asagoo ku dhex daraaya** jumlad. Tusaale: *Wax iiga sheeg wax aad ku aragtay xaafada kaasoo ah mid wayn.*



▶ **Talaabada 5 aad:** U sheeg cunugaaga **inuu qoro ama sawiro** erayga cusub. Ku dhaji erayada cusub iyo sawirada tagaalada ama darbiga, si joogto ahna ugu isticmaal wada sheekaysiyada.

▶ **Talaabada 6 aad:** Ku boori cunugaaga **inuu muraajaceeyo erayga cusub**. Tusaale: *Meeqa jeer ayaa ku dhawaaqi kartaa erayga cusub oo ku jira jumlac hal maalin? Meeqa jeer ayaad aragtaa ama maqashaa erayga?*

Yoolka Waxbarashada: Carruurta waxay baran doonaan ayna ku shaqayn doonaan erayada cusub.


Buundooyinka: Fasalka birimada–3aad

Agabka: Waraaq iyo qalimaanta midabka, qalin qori, ama qalin koobi

Taageerooyinka Dheeraadka ah ee Luuqada

Cunugaaga ayaa dhisi kara eray bixintiisa kordhinaayana luuqadiisa asagoo ku ciyaaraaya erayada. Iskuday inaad adeegsato su'aalaha iyo jawaabaha hoose si aad oga hadasho erayada cusub adoo kaashanaaya cunugaaga.

Su'aalaha Qoyska iyo Daryeelaha	Jawaabaha Ilmaha
Waa maxay erayga cusub ee aad baratay ama maqashay maanta?	Maanta waxaan bartay erayga ____.
Waa maxay macnaha ____?	____ wuxuu ka dhigan yahay ____.
Waa maxay erayga kasoo horjeeda ____? Tusaale: <i>Waa maxay erayga kasoo horjeeda wax wayn?</i>	Erayga kasoo horjeeda ____ waa ____. Tusaale: <i>Erayga kasoo horjeeda wax wayn waa wax yar.</i>
Eraygee la micno ah ____? Tusaale: <i>Eraygee la micno ah wax wayn?</i>	Erayga la micnaha ah ____ waa ____. Tusaale: <i>Erayga la micnaha ah wax wayn waa wax balaaran.</i>



Xujada Erayga:

Adeegso khariirada erayada si aad u bixiso qeexitaan, u tusiso erayada kale la micnaha ah (erayada la macnaha ah) iyo erayada kasoo horjeeda (micnaha kasoo horjeeda), adeegso erayga oo ku jira jumlad oo sawir sawiro la xariira erayga.

